Australian Government

COVID-19 VACCINATION

# Saamaynta COVID-19 ee muddada dheer

27 Juun 20222

Badi dadka qaada COVID-19 waxay yeelan doonaan astaamo muddo gaaban ka dibna way bogsanayaan dhawr toddobaad gudahood. Waqtiga ay qaadato si aad uga bogsatid COVID-19 qof walba wuu ka duwan yahay. Tani waxay kuxidhantahay sida aad ugu xanuunsatey COVID-19. Waxay kaloo ku xidhnaan kartaa haddii aad qabtid xaalado caafimaad oo kale oo jira.

Waxaa jira dadka qaarkood oo la kulma dhibaatooyin caafimaad oo muddo dheer ah kadib markay qadaan COVID-19. Mararka qaarkood COVID-19 waxay qofka u keentaa inuu dareemo caafimaad darro bilo badan kadib markii uu xanuunku bilowga ahaa. Tan waxaa loo yaqaan 'COVID dheer'. COVID dheer wuxuu socon karaa toddobaadyo iyo bilo badan, xitaa ka dib marka qofku aanu hayan fayraska.

COVID ka dheer waxa ay u badan tahey dadka uu sida xun ugu dhacey COVID-19. Haseyeshee xitaa dadka qaba infekshanka COVID-19 ee fudud oo aan u baahnayn inay cusbitaal galaan ayaa weli u u ku kodci kara COVID dheer.

## Astaamaha COVID dheer

COVID ka dheer waxaa uu sababi karaa calaamado kala duwan oo aan isku si wax u yeelin qofkasta. Calaamadaha ee sii socon kara kadib caabuqa ama dib ayey u soo noqon karaan marka qofku ka bogsado COVID-19

Calaamadaha ugu caansan iyo duruufaha la soo wariyey cudurka waa:

- daal
- neefsashada oo dhib ku ah
- qufac joogto ah
- laab xanuun
- xanuun wadajir ah
- tamar aan ku filnayn jimicsiga
- xumad
- madax xanuun
- Dhibaatooyin xagga xusuusta ah iyo dhibka si cad u fikiraya ('ceeryaanta maskaxda')
- diiqad ama walaac.

## Iska ilaalinta COVID dheer

Sida ugu wanaagsan ee laysaga ilaaliyo COVID dheer si aad naftaada uga badbaadisid inaad qaaddi fayraska COVID-19.

Tallaalku waa habka ugu wanaagsan ee lagu yarayn karo halista COVID-19.

Cilmi-baaristu waxay soo jeedinaysaa in dadka laga tallaalay COVID-19 ay aad ugu yar yihiin inay soo sheegaan calaamadaha COVID-ga dheer marka loo eego dadka aan la tallaalin.

## Wixii macluumaad dheeraad ah

Haddii lagaa heley COVID-19 inka badan dhowar wiig oo la soo dhaafey, oo aad wali dareemaysid in aanad caafimaad qabin, la hadal dhakhtarkaaga,

Waxii macluumaad ee dheeraad ah booqo health.gov.au/covid19-vaccines-languages, ama wac Khadka Caawimada Coronavirus ee Qaranka (National Coronavirus Helpline) 1800 020 080. Dooro ikhtiyaarka 8 si aad u heshid adeegyada turjumaanka oo bilaash ah.